



Talo-bixinta bilaashka ah ee
hay'adda Dansk Flygtningehjælp

Maxaa lagaa caawin karaa?

Dansk Flygtningehjælp waxay talo bixin madaxbanaan oo lacag la'aan ah kaa siinaysaa arimaha ay ka mid yihiin:

- Sharciga deganaanshaha (opholdstilladelser): sida isku-keenida qoyska (familiesammenføring), sharciga deganaanshaha abadiga ah (permanent) iyo dhalashada daanishka (statsborgerskab).
- Is-dhexgalka (integration): sida xeerka is-dhexgalka daanishka (integrationsloven) iyo barnaamijka is-dhexgalka dowlahada hoose (integrationsprogrammet).
- Arimaha bulshada (sociale forhold): sida caawin dhagaale, dhibaatooyinka la xiriirka hoyga ama guryaha, arimaha qoyska
- Dhibaatooyinka la xiriira arimaha bulshada iyo maskaxda (psykosociale forhold): maclumaaad iyo jihayn la xiriirta fursadaha dawaynta ee la heli karo.

Waxaan kaa caawin karnaa fahamka waraaqaha laguu soo diro iyo go'aamada sida gaarka ah kuu khuseeya, iyadoo laguu sharaxayo qaabka loo maray go'aan ka gaarista kiiskaaga ama dacwadaada. Waxaa lagaa caawin doonaa qaabka ugu wanaagsan ee aad uga dacwoon kartid go'aamada ay laamaha kala duwan ee dowladdu ka gaaraan kiisaska. Waxaan kugu toosin karnaa meelaha kale aad ka heli kartid talo bixin ku saabsan arimahaaga.

Waxaa muhiim ah inaad horay u soo qaadatid dhammaan wixii waraaqo iyo dokuminti ah ee la xiriira arimaha aad doonaysid in lagaa siiyo talo-bixin. La imow waraaqaha kulantka kowaad ee talo-bixinta.

Ma awoodno inaan kuu helno guri, kuumana furi karno dacwad maxkamadeed (retssag).

Haddii aad qabtid su'aalo la xiriira magangelyada (asyl) iyo guryo-noqoshoo ama ku laabasho dalkii hooyo (repatriering) waxaad la xiriirtaa xafiiska hay'adda Dansk Flygtningehjælp u qaabilسان magangelyada (asylafdeling), tlf. 33 73 50 00.

Yaa loogu talo galay caawinadan?

Talo-bixinta bilaashka ah waxaa loogu talo galay dadka soo-galootiga ah ee ku sugan Denmark sida qaxootiga, dadka lagu keenay isku-keenidda qoyska, iyo dhammaan dadka asakoodu ka soo jeedo soo-galootiga iyadoo aan loo eegayn mudada ay deganaayeen Denmark.

Yaa kula talinaya?

Talo-bixiyaaashu waa dad aqoon u leh arimaha ay ka talo bixinayaan, waxayna si iskaa-wax-uqabso (bilaash ah) kuu siinayaan taloooyin dhex dhexasaad ah. Talo-bixiyaaashu waxay isugu jiraan sharci-yaqaano, la-taliyeeyaaasha arimaha bulshada (socialrådgivere) iyo qaar kale oo leh aqoon iyo waaya-aragnimo kala duwan. Talo-bixiyaaashan ku shaqeeya sida iskaa-wax-u-qabsada ah waxay iskula fariistaan dhowr-dhowr qof oo leh aqoon kala duwan, tusaale ahaan waxaa wada fariista qof sharci-yaqaan ah iyo qof la-taliye arimo bulsheed ah (socialrådgiver).

Dansk Flygtningehjælp ayaa si joogta ah talo-bixiyaashan iskood isku-xilqaamay u siisa taloooyinka iyo macluumaaadka ku saabsan arimaha ay ka talo bixiyaan, si ay ula socdaan am ula jaanqaadaan shuruucda iyo xeerarka khuseeya soo-galootiga, is-dhexgalka iyo arimaha bulshada ee yaal dalka Denmark.

Turjumaad

Haddii aad u baahantahay turjumaan, la xiriir xarunta kuugu dhow ee laga helo talo-bixinta bilaash ka ah, oo waydii in ay hayaan turjumaan bilaash ah oo ku hadla luqadaada. Sidoo kale waxaad soo kaxaysan kartaa qof aad ku kalsoontahay oo kuu tarjuma, laakiin waa in uu noqdaa qof ka wayn 18 sano jir.

Sir qarin

Talo-bixiyaashu waxaa saaran waajib sir-qarineed. Sidaas darteed wax walba oo aad noo sheegtid waqtiga talo bixinta ma ogaanayso cid kale oo saddexaad sida uu qabo sharciga dalku.

Talo-bixinta waxaad u heli kartaa sidan:

Imoow ama soo wac xarunta talo-bixinta waqtiyada ay furantahay. Sidoo kale xarumaha qaarkood waxaad u soo diri kartaa e-mail. Cinwaanada xarumaha, telefoonada laga heli karo iyo waqtiyada ay furan yihiin waxaad ka heli kartaa barteenka internetka: flygting.dk/frivillig/raadgivning

Haddii aad ka imaanaysid meal fog, waxaa wanaagsan in aad soo wacdo xarunta talo-bixinta si aad u ogaatid in aad xarunta ka heli kartid caawinaada aad u baahantahay iyo in kale.

Hay'adda Dansk Flygtningehjælp

Dansk Flygtningehjælp waa hay'ad gaar ah oo madax banaan, waxaana shaqadeeda saldhig u ah mabaadi'da bani'aadamnimo iyo xuquuqda aadanaha. Hay'addu waxay caawisa qaxootiga iyo barakacayaasha iyadoo ilaalinaysa xuquuqdooda , isla markaasna xoojinaysa fursadahooda musqbal. Talo-bixinta bilaashka ahi waxay qayb ka tahay dadaalo iskaa-wax-qabso ah oo ay hay'addu ka wado dalka Denmark oo dhan, waxaana lagu caawiyyaa qaxootiga iyo soo-galootiga si ay uga mid noqon lahayaadeen bulshaweynta daanishka.





Eeg cinwaanada iyo waqtiyada
shaqada ee xarumaha talo-bixinta

www.flygtning.dk/frivillig/raadgivning

